



**Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska
ee Waaxda Booliiska Minneapolis**

Number:
9-100

Volume Nine – Enforcement Policies

Adult Arrests

9-108 Xirista ama haynta dadka waaweyn ee dhaawacmay

(05/29/02) (05/19/08) (06/13/14)

(A-B)

- A.** Dadka qaangaarka ah ee la xiray, ee u baahan daryeel caafimaad oo aanan noqon kuwo loo fasaxay EMS-ta ama shaqaalaha xabsiga waa in loo qaadaa Xarunta Caafimaadka ee Hennepin County (HCMC) ama isbitaal maxalli ah si loo qiimeeyo caafimaadka iyo daawayntaba.
- B.** Kuwa la xiray ee leh suurto galnimada saraysa ee u baahan cusbitaalka, oo ay ku jiraan kuwa la yaqaan ama la tuhunsan yahay adeegsiga maandooriyah, waa in la keenaa HCMC mar kasta oo ay suurtagal tahay. Fiiro gaar ah: Qandaraaska HCSO waxa uu jaal la yahay HCMC waxayna door bidaan in ay gacanta ku dhigaan maxaabiista HCMC.
- C.** Saraakiishu waxay mas'uul ka yihiin haynta dadka la xireen marka ay helayaan daryeel caafimaad.
- D.** Haddii qofka la xidhay uu ku daaho cusbitaalka in ka badan inta ay saraakiisha xiritaanku sugi karaan, saraakiishu waa inay la xiriiraan kormeere. Shaqaalaha isbitaalka ama kuwa ammaanka isbitaalka ma qaban doonaan mana ilaalin doonaan qof la xiray.
- E.** Saraakiishu waa inay sii hayaan haynta dembiilayaasha la xiray ee u baahan daryeel caafimaad ilaa inta kan la xiray loo qaadi karo HCJ.
- F.** Marka la fiirsho kiisaska dembiilayaasha la dhigay cusbitaalka, saraakiisha soo xiraya waa inay ogeysiiyaan kormeerahooda shaqada, kaas oo ka dibna la xiriiraya kormeeraha xabsiga si uu u diyaariyo gargaar.
- G.** Saraakiisha loo xilsaaray agagaarka halka wax lagu xiray waa in ay lahaadaan mas'uuliyadda haynta ilaa inta ay si sax ah fududayn uga helayaan Xafiiska Sheriff County Hennepin (HCSO).